

**Waa maxay cudurka bararka keena ee saameya Qaybo badan oo xubnaha Jirka ka mid ah ee ku dhacda caruurta (MIS-C)?**

Waa xaalad caafimaad oo cusub oo lagu arkay carruurta taasoo u muuqata inay la xiriirto COVID-19. Marka jirkaaga isku dayayo inaad ka bogsatid infekshanka COVID-19, difaaca jirka ee cunuga ayaa laga yaabaa inay si daran ugu jawaab-celiyo infekshanka kasoo sababa barar xad dhaaf ah oo ku dhaca xubnaheeda ama xubnaheeda. MIS-C waxaa lala barbar dhigay cudur kale oo ku dhacda carruurta oo dhif ah lehna barar la mid ah, cudurka Kawasaki, maxaa yeelay wuxuu leeyahay astaamo la mid ah.

**Waa maxay astaamaha cudurka MIS-C?**

- Calool xanuun oo aan sharraxaad kale lahayn
- Labada indhood oo u muuqda guduud khafiif ah ama casaan
- Qanjidhada oo soo weynaada ("qanjidhada") qoorta
- Qandho haysa dhawr maalmood ilmaha, oo aan la aqoonin wax keenay
- Bishimo dildilaacsan, oo casaan ah, ama carrabka oo yeesha midab casaan ah oo u eg strawberiga
- Finan yar yar
- Gacmaha iyo lugaha oo barara, kuwaas oo waliba casaan noqon kara

Hubso inaad u sheegto takhtarkaaga carruurta haddii cunuggaaga laga helay cudurka COVID-19 ama la kulmin qof qaba fayraska. Dhakhtarka caruurta wuu ku ogaysiin doonaa haddii ilmahaagu lagu arki karo xafiiska ama haddii aad u baahan tahay inaad u tagto waaxda gurmada deg dega.

**Waa maxay qeexida MIS-C?**

- Shaqsi jira <21 sano oo qabo qandho, caddeyn shaybaadh oo ah barar, iyo caddeyn cudur xun oo u baahan isbitaal dhigid, oo ay la socoto xubnaha jirka (> 2) ku lug lahaansho (wadnaha, kelyaha, neefsashada, xanuunada dhiiga, calool-iyo-xiidmaha, maqaarka, ama dareemayaasha); IYO
- Ma jiraan baaritaano kale oo suuragal ah; IYO
- Waxaa laga helay COVID-19 ama soo gaaray COVID-19 4 toddobaad gudahood b kahor bilowga astaamaha

**MIS-C ma la kala qaadi karaa?**

Maya. Cunuga waxaa laga yaabaa inuu horay u lahaa infekshanka koronafayraska. Qaar ka mid ah carruurta qaba MIS-C waxay qabaan COVID-19 waana laga qaadi karaa, qaar waxay leyihiin jir-difaace sheegaya in infekshan hore ugu dhacay, qaarna ma laha caddeyn sheegaysa in infekshanka hadda ama hore ugu dhacay. Si kastaba ha noqotee, MIS-C lafteeda lama kala qaadi karo.

**Ma u baahan tahay xaalad caafimaad oo kale si aad u hesho MIS-C?**

Maya. MIS-C uma muuqato inay ku xadidan tahay carruurta horey u qabay cuduro kale oo raagay ama cudar kale oo weyn.

**Haddii aan u malaynayo in ilmahaaga qabo MIS-C, maxay tahay inaan sameeyo?**

Haddii aad u maleynaysid in ilmahaagu qabo MIS-C, waa inaad isla markiiba la xiriirtaa takhtarka canuggaaga ama takhtarka carruurta. Qoysaska leh ilmo qaba cudur halis ahi waa inaysan dib u dhigin helitaanka daryeelka waana inay si deg deg ah uga raadiyaan qolka gurmada deg dega ee ugu dhow.

**Haddii cunuggaygu horey u jiranaa (oo uu qabo cudurka COVID-19 ama aanba laga qaadin baaritaan), laakiin hadda uu caafimaad qabo , miyaan wali ubaahanahay inaan cunugeyga u geeyo dhakhtarkiisa?**

Maya. Waa inaad cunuggaaga dhakhtarka gaysaa haddii ilmahaagu jirado oo ay hayso qandho sare dhowr maalmood. Wac ilmahaaga dhakhtarkiisa si markiiba u helo daryeel caafimaad oo deg deg ah.

**MIS-C ma waxay gaar utahay carruurta?**

Waqti xaadirkan lama yaqaan haddii jirrada bararka dhalisa ee saameysa qaybaha jirka badankiisa ay gaar utahay carruurta ama haddii ay ku dhacdo dadka waaweyn.



Boston Public Health Commission | Infectious Disease Bureau

1010 Massachusetts Avenue | Boston, MA 02118 | [www.bphc.org](http://www.bphc.org) | 617-534-5611